51. Hadaad arki lahayd Nabiyow markay argagaxaan gaaladu oo meeley u cararaan jirin oo meel dhaw laga qabto, (waxaad arki lahayd arrin wayn).

وَلَوْ تَرَىٰٓ إِذْ فَزِعُوا۟ فَلَا فَوْتَ وَأُخِذُوا۟ مِن مَّكَانٍ
قَرِيبٍ ﴿٥١﴾

52. Waxay dhihi markaas waxaan rumaynay (xaqa) xagay uga ahaan inay meel fog wax ku qaataan (rumayn).

وَقَالُوٓا۟ ءَامَنَّا بِهِۦ وَأَنَّىٰ لَهُمُ ٱلتَّنَاوُشُ مِن مَّكَانٍۭ
بَعِيدٍ ﴿٥٢﴾

53. Dhab ahaanna waa iyagii uga gaaloobay xaqa, horay ay ka tuurayeen waxayan ogayn meel fog.

وَقَدْ كَفَرُوا۟ بِهِۦ مِن قَبْلُ ۖ وَيَقْذِفُونَ
بِٱلْغَيْبِ مِن مَّكَانٍۭ بَعِيدٍ ﴿٥٣﴾

54. Waana la kala ooday iyaga iyo waxay doonayeen sidii lagu falay kuwii la midka ahaa ee ka horeeyay, waxayna ahaayeen kuwo shaki daran ku sugan.

وَحِيلَ بَيْنَهُمْ وَبَيْنَ مَا يَشْتَهُونَ كَمَا فُعِلَ بِأَشْيَاعِهِم
مِّن قَبْلُ ۚ إِنَّهُمْ كَانُوا۟ فِى شَكٍّ مُّرِيبٍۭ ﴿٥٤﴾

Qiyaamadu waa maalin daran, oo dhib iyo shiddo badan lagana argagaxo, markase gaalada si kada ah loo qabto, waqti wax la rumeeyana dhamaaday oo fogaaday illeen aduun kiibay ahayde, iyana waa kuwii adduunka ku gaaloobay ee xaqa beeniyey ee jaahilnimo iyo waxwalba oo xumaan ah ku sheegay waxay jeclaayeenna la kala dheereeyo oo lakala awdo sidii lagu falay kuwii la midka ahaa ee ka horreeyey illeen xaqay shakiyeene, muxuu tari calaacal iyo catow, ruuxii aqli lehse waa inuu xaqa si fiican ugu taagnaado, si uu u nabadgalo. qataade wuxuu yidhi iska jira shaki illeen ruuxii shaki ku dhinta waa lagu soo bixin, ruuxi yaqiin ku dhinta waa lagu soo bixine. Saba' (51-54).

## Suurat Faadhir — سورة فاطر

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Mahad Eebaha billaabay «abuuray» samooyinka iyo dhulka yaaleh kana yeelay Malaa'igta farriinwade, oo garbolabo labo ah iyo saddex saddex iyo afar afar ah leh, wuuna siyaadiyaa Eebe abuuriduu doono, Eebana wax walba uu doono wuu karaa.

ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ فَاطِرِ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ جَاعِلِ ٱلْمَلَٰٓئِكَةِ
رُسُلًا أُو۟لِىٓ أَجْنِحَةٍ مَّثْنَىٰ وَثُلَٰثَ وَرُبَٰعَ ۚ يَزِيدُ فِى ٱلْخَلْقِ
مَا يَشَآءُ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿١﴾

2. Wixii Eebe dadka ugu nicmeeyo oo naxariis ah wax celin karaa majiro, wuxuu celiyaana wax siidayn kara ma jiro dabadiis, waana adkaade falsan.

مَّا يَفْتَحِ ٱللَّهُ لِلنَّاسِ مِن رَّحْمَةٍ فَلَا مُمْسِكَ لَهَا ۖ
وَمَا يُمْسِكْ فَلَا مُرْسِلَ لَهُۥ مِنۢ بَعْدِهِۦ ۚ
وَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْحَكِيمُ ﴿٢﴾

3. Dadow xusuusnaada nicmada Eebe ee korkiina ah, abuure kale ma jiraa oo Eebe ka soo hadhay oo idinka arsuqi samada iyo dhulka, Eebe mooyee ilaah kale majiro ee xaggee laydiin ka iili xaqa.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ ٱذْكُرُوا۟ نِعْمَتَ ٱللَّهِ عَلَيْكُمْ ۚ هَلْ مِنْ خَٰلِقٍ
غَيْرُ ٱللَّهِ يَرْزُقُكُم مِّنَ ٱلسَّمَآءِ وَٱلْأَرْضِ ۚ لَآ إِلَٰهَ
إِلَّا هُوَ ۖ فَأَنَّىٰ تُؤْفَكُونَ ﴿٣﴾

Eebaha cirka iyo dhulka abuuray ee malaa‘igta diray waxwalbana kara yaa mahad mudan’khayrkuu keenana wax celin kara majiro, wuxuu reebana wax keenikaraa ma jiro, dadkana waxaa waajib ku ah inay xusuustaan Nicmada Eebe iyo inaan Eebe mooyeen cid kale wax ka arsuqaynin cirka iyo dhulka. Ibnu cabaas (Eebe isaga iyo Aabihiisba ha ka raali noqdee) wuxuu yidhi ma aqoonin macnaha faadhir intaan uga imaado Laba nin oo ka mid ah baadiyaha Carbeed oo ku doodi ceel oo mid kood ku yidhi kii kale Anaa fadhiray (Bilaabayqodidda). Faadhir (1-3).

---

4. Hadday ku beeniyaan waxaa dhab ahaan loo beeniyay rasuulladii kaa horreeyay, Eeba xagiisaana loo celin umuuraha.

وَإِن يُكَذِّبُوكَ فَقَدْ كُذِّبَتْ رُسُلٌ مِّن قَبْلِكَ ۚ
وَإِلَى ٱللَّهِ تُرْجَعُ ٱلْأُمُورُ ﴿٤﴾

5. Dadaw yabooha Eebe waa xaq ee yayna idindhagrin nolasha aduunyo, yuuna idinkudhagrin Eebe ku dhagris badane (shaydaan).

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ إِنَّ وَعْدَ ٱللَّهِ حَقٌّ ۖ فَلَا تَغُرَّنَّكُمُ ٱلْحَيَوٰةُ
ٱلدُّنْيَا ۖ وَلَا يَغُرَّنَّكُم بِٱللَّهِ ٱلْغَرُورُ ﴿٥﴾

6. Shaydaanku waa colkiin ee idinna col ka yeesha, wuxuuna idiin ku yeedhi uun xisbigiisa si ay asaxaabta Naaarta saciiro u noqdaan.

إِنَّ ٱلشَّيْطَٰنَ لَكُمْ عَدُوٌّ فَٱتَّخِذُوهُ عَدُوًّا ۚ إِنَّمَا يَدْعُوا۟
حِزْبَهُۥ لِيَكُونُوا۟ مِنْ أَصْحَٰبِ ٱلسَّعِيرِ ﴿٦﴾

7. Kuwii gaaloobay waxay mudan cadaab daran, kuwii xaqa rumeeyay oo camal fiican falayna waxay mudan dambi dhaaf iyo ajri wayn.

ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ لَهُمْ عَذَابٌ شَدِيدٌ ۖ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟
ٱلصَّٰلِحَٰتِ لَهُم مَّغْفِرَةٌ وَأَجْرٌ كَبِيرٌ ﴿٧﴾

8. Ruuxse loo qurxiyay camalkiisa xun oo u arkay inuu fiicanyahay (ma lamid baa kaan saas falin), Eebe cidduu doono yuu dhumiyaa Ruuxuu doonana wuu Hanuuniyaa ee yeyna Naftaadu ku tagin walbahaarkooda, Eebe waa ogyahay waxay samayne.

أَفَمَن زُيِّنَ لَهُۥ سُوٓءُ عَمَلِهِۦ فَرَءَاهُ حَسَنًا ۖ فَإِنَّ ٱللَّهَ يُضِلُّ
مَن يَشَآءُ وَيَهْدِى مَن يَشَآءُ ۖ فَلَا تَذْهَبْ نَفْسُكَ
عَلَيْهِمْ حَسَرَٰتٍ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلِيمٌۢ بِمَا يَصْنَعُونَ ﴿٨﴾

Eebaheen had iyo jeer wuxuu calool adkayn jiray Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) wuxuuna xusuusin jiray Nabiyadii hore iyo waxay kala kulmeen gaaladii oo dhib iyo beenin ah, tan kale wuxuu Eebe yabooho wuu dhici’mana haboona in lagu kadsoomo aduunyo, shaydaan kugu kadiyo, illeen waa colka bini aadamkee’wuxuuna dooni inaad ka mid noqotid xisbigiisa si aad saciiro ula gashid, Xumaanle iyo Wanaaglena ma sina, mana aha in xumaantu kula qurux sanaato, kulana fiicnaato, waase in Eebe Hanuun la warsado xumaantana laga leexdo, Nabiguna waxba kama saarna cidii iska dhunta oo shaydaan adeecda. Faadhir (4-8).

9. Eebe waa kan diray dabaysha oy kiciso daruuro markaasaan u kaxayn magaalo dhimatay (abaarowday) markaasaan ku noolaynay roobkaas dhulka intuu dhintay ka dib, saas weeye soo bixintiina.

وَٱللَّهُ ٱلَّذِىٓ أَرْسَلَ ٱلرِّيَـٰحَ فَتُثِيرُ سَحَابًا فَسُقْنَـٰهُ إِلَىٰ بَلَدٍ
مَّيِّتٍ فَأَحْيَيْنَا بِهِ ٱلْأَرْضَ بَعْدَ مَوْتِهَا ۚ كَذَٰلِكَ
ٱلنُّشُورُ ﴿٩﴾

10. Ruuxii dooni sharaf Eebaa iska lehsharaf dhammaanteed,xagiisayna u koraan kalimooyinka fiican, camalka suubanna wuu kor yeelaa, kuwa xumaanta ku dhagra (maamula) waxay mudan cadaab daran,dhagarta kuwaasna way uun halaagi.

مَن كَانَ يُرِيدُ ٱلْعِزَّةَ فَلِلَّهِ ٱلْعِزَّةُ جَمِيعًا ۚ إِلَيْهِ يَصْعَدُ
ٱلْكَلِمُ ٱلطَّيِّبُ وَٱلْعَمَلُ ٱلصَّـٰلِحُ يَرْفَعُهُۥ ۚ وَٱلَّذِينَ
يَمْكُرُونَ ٱلسَّيِّـَٔاتِ لَهُمْ عَذَابٌ شَدِيدٌ ۖ
وَمَكْرُ أُو۟لَـٰٓئِكَ هُوَ يَبُورُ ﴿١٠﴾

11. Eebe waa kan idinka abuuray Carro,hadana dhibic,markaas Lab iyo dhadig, haweenayna wax uurka kuma qaado mana dajiso ogaansho Eebe mooyee, ruuxii cimri dheer iyo ruuxii cimri gaabanba waxay ku sugan yihiin kitaabka Eebe,waana u fudud yahay.

وَٱللَّهُ خَلَقَكُم مِّن تُرَابٍ ثُمَّ مِن نُّطْفَةٍ ثُمَّ جَعَلَكُمْ
أَزْوَٰجًا ۚ وَمَا تَحْمِلُ مِنْ أُنثَىٰ وَلَا تَضَعُ إِلَّا بِعِلْمِهِۦ ۚ
وَمَا يُعَمَّرُ مِن مُّعَمَّرٍ وَلَا يُنقَصُ مِنْ عُمُرِهِۦٓ
إِلَّا فِى كِتَـٰبٍ ۚ إِنَّ ذَٰلِكَ عَلَى ٱللَّهِ يَسِيرٌ ﴿١١﴾

Roobka Eebaa keena siduu dabaysha roobka hor socotaba u keeno, roobkaasoo uu ku nooleeyo magaalo abaarowday'doogna ka soo baxo sidasaana loo soo bixin dadka qiyaamada, sharaf iyo cisiba Eebaa iska leh dhamaanted, wanaaguna Eebuu u koraa, sida uu u kor yeelo camallada fiican, xumaan iyo dhagarna saaxiibkeeda unbay dishaa oy halaagi, Eebana waa kan dadka carro ka abuuray (Aabahood Aadan) hadana candhuuf ka abuuray, kana dhiga Rag iyo Haween wax kastana waa ogyahay Eebe, uur haweenay, dhalidda cimriga dheer, kan gaaban, wax walbana Eebe waa u fudud yahay, xasan basri wuxuu yidhi: Hadal lama aqbalo camal la‘aan tiis. Faadhir (9-11).

---

12. Ma eka labada badood taasi waa macaantahay si daran,taasina waa dhanaan daran mid kastana waxaad ka cunaysaan hilib cusub, waxaadna kala baxdaan Macdan aad xidhataan, waxaadna arkaysaan doonta oo jiidhi si aad u dalabtaan fadliga Eebe iyo inaad ku mahadisaan.

وَمَا يَسْتَوِى ٱلْبَحْرَانِ هَـٰذَا عَذْبٌ فُرَاتٌ سَآئِغٌ
شَرَابُهُۥ وَهَـٰذَا مِلْحٌ أُجَاجٌ ۖ وَمِن كُلٍّ تَأْكُلُونَ لَحْمًا
طَرِيًّا وَتَسْتَخْرِجُونَ حِلْيَةً تَلْبَسُونَهَا ۖ وَتَرَى
ٱلْفُلْكَ فِيهِ مَوَاخِرَ لِتَبْتَغُوا۟ مِن فَضْلِهِۦ
وَلَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿١٢﴾

13. Habeenka yuu Eebe dhexgaliyaa maalinta Maalintana wuxuu dhexgaliyaa Habeenka, Qoraxda iyo dayaxana wuu sakhiray mid kastana wuxuu ku socdaa muddo magacaaban, saas waxa falana waa Eebihiin, isagaana xu-

يُولِجُ ٱلَّيْلَ فِى ٱلنَّهَارِ وَيُولِجُ ٱلنَّهَارَ فِى ٱلَّيْلِ
وَسَخَّرَ ٱلشَّمْسَ وَٱلْقَمَرَ كُلٌّ يَجْرِى
لِأَجَلٍ مُّسَمًّى ۚ ذَٰلِكُمُ ٱللَّهُ رَبُّكُمْ لَهُ ٱلْمُلْكُ ۚ

kunka iska leh, waxaadse baryeysaan (caabudaysaan) oo Eebe ka soo hadhay ma hantaan xuub laf timireed.

وَٱلَّذِينَ تَدْعُونَ مِن دُونِهِۦ مَا يَمْلِكُونَ
مِن قِطْمِيرٍ ﴿١٣﴾

14. Hadaad u yeedhataana idin ma maqlaan, haday idinbase maqlaan wax idiima taraan, Qiyaamadana way diidigaalnimadooda, cid wax og. sidaana wax kuugu warrama ma jiro.

إِن تَدْعُوهُمْ لَا يَسْمَعُوا۟ دُعَآءَكُمْ وَلَوْ سَمِعُوا۟
مَا ٱسْتَجَابُوا۟ لَكُمْ ۖ وَيَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ يَكْفُرُونَ
بِشِرْكِكُمْ ۚ وَلَا يُنَبِّئُكَ مِثْلُ خَبِيرٍ ﴿١٤﴾

Wabiyada iyo Badaha Eebaa dureeriya qaarna macaaneeya qaar kalana kharaareeya, cunno iyo Kalluuna mid kasta ku beeray'si hilib nadiif ah loogu cuno'jowharna loogala baxo, doonyuhuna u dhex mushiixaan, si ay khayraadka Eebe u raadsadaan, looguna mahdiyo'Habeenka, Maalinta, Qoraxda, iyo Dayaxaba Eebaa sakhiray'si ay ushaqeeyaan tan iyo mudadii loo qabtay‘xukunka caalamka iyo awoodiisana Eebaa iska leh'wax la wadaaga oo wax laga baryi ama wax maqli ama wax ajiibana ma jiro, sida Eebaha wax walba og wax kuugu cadeeyana ma jiro. Faadhir (12-14).

---

15. Dadow idinka unbaa fuqara ah (u baahan) Eebe, Eebena waa hodan amaanan.

۞ يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ أَنتُمُ ٱلْفُقَرَآءُ إِلَى ٱللَّهِ ۖ
وَٱللَّهُ هُوَ ٱلْغَنِىُّ ٱلْحَمِيدُ ﴿١٥﴾

16. Hadduu doono wuu idin dhamayn wuxuuna keeni kuwo cusub.

إِن يَشَأْ يُذْهِبْكُمْ وَيَأْتِ بِخَلْقٍ جَدِيدٍ ﴿١٦﴾

17. Arrintaasna wax Eebe ku culus ma aha.

وَمَا ذَٰلِكَ عَلَى ٱللَّهِ بِعَزِيزٍ ﴿١٧﴾

18. Nafna naf kale dambigeed ma qaado, haddii looguyeedho Naf culusoo dambaabtay inay xambaarto (danbi naf kale) lagama xambaaro waxba haba noqoto qaraabanee, waxaad uun u digi kuwa ka yaabi Eebe iyagoo maqan, oo ooga salaadda, ruuxii isdaahiriyana wuxuu uun isudaahiriyay naftiisa, xaga Eebe unbaana loo ahaan (geeri dabadeed).

وَلَا تَزِرُ وَازِرَةٌ وِزْرَ أُخْرَىٰ ۚ وَإِن تَدْعُ مُثْقَلَةٌ
إِلَىٰ حِمْلِهَا لَا يُحْمَلْ مِنْهُ شَىْءٌ وَلَوْ كَانَ ذَا قُرْبَىٰٓ ۗ
إِنَّمَا تُنذِرُ ٱلَّذِينَ يَخْشَوْنَ رَبَّهُم بِٱلْغَيْبِ
وَأَقَامُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ ۚ وَمَن تَزَكَّىٰ فَإِنَّمَا يَتَزَكَّىٰ
لِنَفْسِهِۦ ۚ وَإِلَى ٱللَّهِ ٱلْمَصِيرُ ﴿١٨﴾

Eebe waa hodan'waana ka kaaftoomaa adoomadiisa, iyaguse waa fuqoro u baahan Eebe had iyo jeerba, wuxuuna karaa Eebe inuu halaago ciddii uu doono'kuna bedalo cid kale, wax Eebe dhib ku ahna ma aha, tan kale nafu nafkale danbigeed ma qaaddo, ee naf walba waxay kasbatay uunbaa horyala, qaraabonimana danbi lays kagama qaado, waxayse waanadu anfacdaa kuwa Eebe ka yaaba iyagoon arkayn, oo salaadda u dadaala, oo xumaan iska daahiriya, dadkuna xagga Eebe unbuu u ahaan, Cigrime wuxuu yidhi: maalinta Qiyaame darisku dariskuu ku dhagi, qaraabaduna way isku dhagi'ruuxna ruuxa kale wax uma taro Eebe idamkii mooyee. Faadhir (15-18).

19. Ma Eka indhoole iyo wax arke.

وَمَا يَسْتَوِي الْأَعْمَىٰ وَالْبَصِيرُ ﴿١٩﴾

20. Mana eka mugdiyo iyo iftiin.

وَلَا الظُّلُمَاتُ وَلَا النُّورُ ﴿٢٠﴾

21. Mana eka hoos iyo kulayl.

وَلَا الظِّلُّ وَلَا الْحَرُورُ ﴿٢١﴾

22. Mana eka kuwa nool iyo kuwo dhintay, Eebana wuxuu wax maqashiiyaa cidduu doono, mase maqashiin kartid cid qubuur ku sugan (gaaladuna waa wax dhintay oo kale).

وَمَا يَسْتَوِي الْأَحْيَاءُ وَلَا الْأَمْوَاتُ ۚ إِنَّ اللَّهَ يُسْمِعُ مَن يَشَاءُ ۖ
وَمَا أَنتَ بِمُسْمِعٍ مَّن فِي الْقُبُورِ ﴿٢٢﴾

23. Waxaan u dige ahayn ma tihid.

إِنْ أَنتَ إِلَّا نَذِيرٌ ﴿٢٣﴾

24. Annagaa kugu dirray xaq adoo bishaarayn oo digi,umadaan udige loo dirinna ma jirto.

إِنَّا أَرْسَلْنَاكَ بِالْحَقِّ بَشِيرًا وَنَذِيرًا ۚ وَإِن مِّنْ أُمَّةٍ
إِلَّا خَلَا فِيهَا نَذِيرٌ ﴿٢٤﴾

25. Haday gaaladu ku beeniyaan waxaa wax beeniyay kuwii ka horreeyay, waxay ula timid rasuuladoodii xujooyin iyo kutub (waano) oo xukun leh.

وَإِن يُكَذِّبُوكَ فَقَدْ كَذَّبَ الَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ
جَاءَتْهُمْ رُسُلُهُم بِالْبَيِّنَاتِ وَبِالزُّبُرِ وَبِالْكِتَابِ
الْمُنِيرِ ﴿٢٥﴾

26. Markaasaan qabtay kuwii gaaloobay, sayse noqotay ciqaabtaydii (aan ciqaabay kuwaas).

ثُمَّ أَخَذْتُ الَّذِينَ كَفَرُوا ۖ فَكَيْفَ كَانَ نَكِيرِ ﴿٢٦﴾

**Eebeheen sarreeye wuxuu inoogu caddeeyay tusaale inayna ekeyn indhoole iyo wax arke, Mugdi iyo Nuur, Ruux dhintay iyo ruux nool. Saasoo kale ma sinna mu‘miniinta iyo gaaladu, Eebena cidduu doono oo xaqa jecel yuu wax maqashiiyaa, gaalase quluubtoodu dhimatay wax lama maqashiin karo’Nabigana waa uun dige sidii Rasuuladii ka horeeyay ee la beeniyay, Eebena umad qudha kuma dayn jaahilnimo ee cidkasta waxaa loo diray wax u diga oo xaqa u cadeeya oo kutub waano iyo wanaagleh loo soo dhiibay kuwii beeniyayna waa la halligay. Faadhir (19-26).**

---

27. Miyaadan arkayn in Eebe ka soo dajiyay Samada biyo markaasna aan ku soo bixinaa Midho ay kala duwanyihiin midabkoodu, Buurahana waxaa ka mid ah wadooyin cad cad, iyo kuwo guduud ah oo midabo kala duwan leh iyo kuwo madow daran ah.

أَلَمْ تَرَ أَنَّ اللَّهَ أَنزَلَ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَأَخْرَجْنَا بِهِ
ثَمَرَاتٍ مُّخْتَلِفًا أَلْوَانُهَا ۚ وَمِنَ الْجِبَالِ جُدَدٌ بِيضٌ
وَحُمْرٌ مُّخْتَلِفٌ أَلْوَانُهَا وَغَرَابِيبُ سُودٌ ﴿٢٧﴾

28. Dadka iyo dhulsocotada iyo xoolahaba waxaa ka mid ah midabo kala duwan saas oo kale.

وَمِنَ النَّاسِ وَالدَّوَابِّ وَالْأَنْعَامِ
مُخْتَلِفٌ أَلْوَانُهُ كَذَٰلِكَ ۗ إِنَّمَا يَخْشَى اللَّهَ
مِنْ عِبَادِهِ الْعُلَمَاءُ ۗ إِنَّ اللَّهَ عَزِيزٌ غَفُورٌ ﴿٢٨﴾

29. Kuwa akhriya kitaabka Eebe oo salaadda ooga oo wax ka nafaqeeya (ka bixiya) waxaan ku arsaaqnay qarsoodi iyo caddaanba waxay rajayn tijaaro (ganacsi) aan baaraynin.

إِنَّ ٱلَّذِينَ يَتْلُونَ كِتَٰبَ ٱللَّهِ وَأَقَامُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ
وَأَنفَقُوا۟ مِمَّا رَزَقْنَٰهُمْ سِرًّا وَعَلَانِيَةً
يَرْجُونَ تِجَٰرَةً لَّن تَبُورَ ﴿٢٩﴾

30. Si Eebe ugu oofiyo ajrigooda uguna siyaadiyo fadligiisa, illeen Eebe waa dambi dhaafe mahad badane.

لِيُوَفِّيَهُمْ أُجُورَهُمْ وَيَزِيدَهُم مِّن فَضْلِهِۦٓ ۚ
إِنَّهُۥ غَفُورٌ شَكُورٌ ﴿٣٠﴾

Eebe sarreeye wuxuu ku baraarujin qudradiisa iyo waynida awoodiisa uu abuurayna waxyaalo ku kala duwan midabka sida midhaha oo hadana ku soo baxay Biyo kaliya, sido kale buuraha kala duwan, iyo dadka, xoolaha iyo naflayda kalaba, waxaana arintaas u dhug yeelan oo ku waano qaadan culimada Eebe ka cabsada, waxaa kale oo Eebe ka waramay in adoomadiisa rumeeyay ay yihiin kuwa akhriya kitaabka Eebe (quraanka) kuna camalfala wuxuu fari'salaadana ooga waxna bixiya hoos iyo korba, waxayna rajayn kuwaasi ganacsi khayr leh oon baaraynin, Eebana wuxuu u oofin ajrigooda'wuxuuna u kordhin fadligiisa. Qataade wuxuu yidhi: Mudharif wuxuu ahaa Eebe ha u naxariistee markuu akhriyo aayadan kii dhaha: aayadani waa aayada qurraada. Faadhir (27-30).

---

31. Kaan kuu waxyoonay ee Quraanka ah unbaa xaq ah wixii ka horreeyayna u rumayn Eebana addoomadiisa waa ogyahay, arkaana.

وَٱلَّذِىٓ أَوْحَيْنَآ إِلَيْكَ مِنَ ٱلْكِتَٰبِ هُوَ ٱلْحَقُّ مُصَدِّقًا
لِّمَا بَيْنَ يَدَيْهِ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ بِعِبَادِهِۦ لَخَبِيرٌۢ بَصِيرٌ ﴿٣١﴾

32. Markaasaan dhaxalsiinay kitaabka kuwaan dooranay oo addoomadanada ka mid ah, waxaase ka mid ah mid dulmiyay naftiisa, iyo mid dhexdhexaystay, iyo mid ku hanuunay khayrka idanka Eebe, arrintaasna waa fadli weyn.

ثُمَّ أَوْرَثْنَا ٱلْكِتَٰبَ ٱلَّذِينَ ٱصْطَفَيْنَا مِنْ عِبَادِنَا ۖ
فَمِنْهُمْ ظَالِمٌ لِّنَفْسِهِۦ وَمِنْهُم مُّقْتَصِدٌ وَمِنْهُمْ
سَابِقٌۢ بِٱلْخَيْرَٰتِ بِإِذْنِ ٱللَّهِ ۚ ذَٰلِكَ
هُوَ ٱلْفَضْلُ ٱلْكَبِيرُ ﴿٣٢﴾

33. Jannada cadnin yeyna gali iyagoo loogu xidhi dhexdeeda asaawir (wax lagu xarragoodo) oo dahab iyo Jawharba leh, dhar kooduna dhexdeeda waa xariir.

جَنَّٰتُ عَدْنٍ يَدْخُلُونَهَا يُحَلَّوْنَ فِيهَا مِنْ أَسَاوِرَ
مِن ذَهَبٍ وَلُؤْلُؤًا ۖ وَلِبَاسُهُمْ فِيهَا حَرِيرٌ ﴿٣٣﴾

34. Waxayna dhihi waxaa mahad leh Eebaha naga tagsiiyay walbahaarka, illeen Eebeheen waa danbi dhaaf badane mahad badane.

وَقَالُوا۟ ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ ٱلَّذِىٓ أَذْهَبَ عَنَّا ٱلْحَزَنَ ۖ
إِنَّ رَبَّنَا لَغَفُورٌ شَكُورٌ ﴿٣٤﴾

35. Eebihii nadajiyay guri nagaadi fadligiisa dartiis (janno) nagumana

ٱلَّذِىٓ أَحَلَّنَا دَارَ ٱلْمُقَامَةِ مِن فَضْلِهِۦ لَا يَمَسُّنَا

فِيهَا نَصَبٌ وَلَا يَمَسُّنَا فِيهَا لُغُوبٌ ﴿٣٥﴾

taabto dhexdeeda dhib, nagumana taabto daal.

**Quraanka Eebaa u waxyooday Nabiga Maxamed ah (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) waana xaq sugan oo u rumayn wixii xaqa ahaa ee ka horreeyay,waxaana dhaxal u helay kitaabkaas addoomada Eebe kooda yardambaabay, kooda dhexdhaxaystay iyo kooda khayrka ku hanuunay, arrintaasuna waa deeq Eebe oo wayn, waxayna gali dhamaantood Jannooyin lagu nagaado ooy ku dhex xidhan dhar sharaf leh ooy Eebe ku mahdin, walbahaarna uu ka dheereeyay dajiyayna guri aan dhib iyo daal midna lahayn (jannada), Dhabaraani wuxuu wariyay ibnu Cumar inuu yidhi Rasuulkii Eebe Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha yeelee: Ruuxa ashahaata kuma cidloobo geerida, Qabriga iyo soobixinta midna. Faadhir (31-35).**

---

وَالَّذِينَ كَفَرُوا لَهُمْ نَارُ جَهَنَّمَ لَا يُقْضَىٰ عَلَيْهِمْ
فَيَمُوتُوا وَلَا يُخَفَّفُ عَنْهُم مِّنْ عَذَابِهَا كَذَٰلِكَ
نَجْزِي كُلَّ كَفُورٍ ﴿٣٦﴾

36. Kuwii gaaloobay waxay mudan naarta Jahannamo, laguma xukumo geeri oy dhintaan, lagamana fududeeyo Cadaabkeeda, saasaana ku abaal marinaa mid kastoo gaalimo badan.

وَهُمْ يَصْطَرِخُونَ فِيهَا رَبَّنَا أَخْرِجْنَا نَعْمَلْ صَالِحًا
غَيْرَ الَّذِي كُنَّا نَعْمَلُ أَوَلَمْ نُعَمِّرْكُم
مَّا يَتَذَكَّرُ فِيهِ مَن تَذَكَّرَ وَجَاءَكُمُ النَّذِيرُ
فَذُوقُوا فَمَا لِلظَّالِمِينَ مِن نَّصِيرٍ ﴿٣٧﴾

37. Waxay ku qaylyi dhexdeeda Eeboow naga bixi aan camal fiican oo kaan sameynjirray ka duwan fallee, miyaanaan idin cimri siin muddo uu wax ku xusuusto ruuxii wax xusuusan oosan idiin imaanin dige (Nabiga) ee dhadhamiya gaaloy (ciqaabta) uma sugnaanin daalimiin gargaaree.

إِنَّ اللَّهَ عَالِمُ غَيْبِ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ
إِنَّهُ عَلِيمٌ بِذَاتِ الصُّدُورِ ﴿٣٨﴾

38. Eebe wuxuu ogyahay waxa ku maqan samooyinka iyo dhulka, wuxuuna ogyahay waxa laabta (Qalbiga) ku sugan.

هُوَ الَّذِي جَعَلَكُمْ خَلَائِفَ فِي الْأَرْضِ فَمَن كَفَرَ فَعَلَيْهِ
كُفْرُهُ وَلَا يَزِيدُ الْكَافِرِينَ كُفْرُهُمْ عِندَ رَبِّهِمْ
إِلَّا مَقْتًا وَلَا يَزِيدُ الْكَافِرِينَ كُفْرُهُمْ إِلَّا خَسَارًا ﴿٣٩﴾

39. Eebe waa kan idinka dhigay kuwo dhulka iska badala, ruuxii gaaloobase gaalnimadiisu isagaydhibi, Gaaladana uma kordhiso gaalimadoodu Eebahood agtiisa cadho mooyee, umana kordhiso gaalada gaalnimadu khasaaro mooyee.

**Had iyo jeer Quraanku wuxuu isla xidhiidhiyaa xaalka kuwa wanaagga fala iyo kuwa xumaanta sameeya, iyo waxa mid kasta loo darbay, aayadahanna waxaysheegi inay gaalo usugnaatay Naar ayan ka dhimanayn lagana fududaynayn, waana abaalka gaalimabadane o dhan, qaylo iyo Eeboow Naarta naga bixi aan wanaag falee wax matarto markaas oo kale, maxaa yeelay cimri wax lagu xusuusto waa la siiyay udigana wuu u yimid, Eebana wax walba waa ogyahay isagaana dhulka ku kala badala dadka, gaalimo iyo Xumaanna waxaan cadho Eebe iyo khasaare ahayn ma kordhiso,wuxuu yidhi Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Eebe waa u dhameeyay cudurdaar ruuxuu dib udhigay intuu ka gaadho lixdan sano. Waxaa wariyay Bukhaari. Faadhir (36-39).**

40. Ka warrama shariigyada aad baryeysaan ood (caabudaysaan) Eebe ka sokow, i tusiya waxay abuureen-dhulka, ama wadaag ah oy ku leeyihiin samooyinka, mise waxaan siinay Kitaab oo ay xujeeysan, saas ma aha ee gaalada qaarkood qaar uma yabooho waaxaan Dhagar ahayn.

قُلْ أَرَءَيْتُمْ شُرَكَآءَكُمُ ٱلَّذِينَ تَدْعُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ
أَرُونِى مَاذَا خَلَقُوا۟ مِنَ ٱلْأَرْضِ أَمْ لَهُمْ شِرْكٌ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ
أَمْ ءَاتَيْنَٰهُمْ كِتَٰبًا فَهُمْ عَلَىٰ بَيِّنَتٍ مِّنْهُ
بَلْ إِن يَعِدُ ٱلظَّٰلِمُونَ بَعْضُهُم بَعْضًا إِلَّا غُرُورًا ﴿٤٠﴾

41. Eebaa ka haya Samooyinka iyo dhulka inay gilgishaan (oo tagaan), haday gilgishaana waxaan Eebe ahayn oo qaban ma jiro, Eebena waa dulbadane dhaafid badan.

۞ إِنَّ ٱللَّهَ يُمْسِكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ أَن تَزُولَا
وَلَئِن زَالَتَآ إِنْ أَمْسَكَهُمَا مِنْ أَحَدٍ مِّنۢ بَعْدِهِۦٓ
إِنَّهُۥ كَانَ حَلِيمًا غَفُورًا ﴿٤١﴾

42. Waxay ugu dhaarteen Eebe dhaar adag hadduu uyimaado udige inay noqdaan kuwa ka hanuunsan (ka toosan) umadaha kale,. markuu uyimid digihiina uma siyaadinin waxaan carar ahayn.

وَأَقْسَمُوا۟ بِٱللَّهِ جَهْدَ أَيْمَٰنِهِمْ لَئِن جَآءَهُمْ نَذِيرٌ
لَّيَكُونُنَّ أَهْدَىٰ مِنْ إِحْدَى ٱلْأُمَمِ فَلَمَّا جَآءَهُمْ نَذِيرٌ
مَّا زَادَهُمْ إِلَّا نُفُورًا ﴿٤٢﴾

43. isku kibrin dhulka iyo dhagar xun darteed, dhagarna xumaan waxaan ahayn ehelkiisa kuma dhaco ee miyaad sugaysaan waxaan wadadii kuwii hore ahayn,mana helaysid sunnada Eebe wax badala,ma helaysid sunnada Eebe wax wareejiya.

ٱسْتِكْبَارًا فِى ٱلْأَرْضِ وَمَكْرَ ٱلسَّيِّئِ وَلَا يَحِيقُ
ٱلْمَكْرُ ٱلسَّيِّئُ إِلَّا بِأَهْلِهِۦ فَهَلْ يَنظُرُونَ إِلَّا سُنَّتَ
ٱلْأَوَّلِينَ فَلَن تَجِدَ لِسُنَّتِ ٱللَّهِ تَبْدِيلًا وَلَن تَجِدَ لِسُنَّتِ
ٱللَّهِ تَحْوِيلًا ﴿٤٣﴾

Gaaladu ma keeni karaan wax xujo ah oo kutusin toosnida waxay caabudi oo Eebe ka soo hadhay, waxay sheegi ama caabudina waa been aan wax ka jirin'waxaase xaqah Eebaha cirka iyo dhulka haya sugayna, gaaladii qureesheedana in kastooy ku dhaaran jireen in hadii Nabi loo soo diro ay rumayn'hadana markuu Nabigu xaqa ula yimid way beeniyeen isla wayni iyo dhagar darteed'dhagarna ruuxeeday halaagtaa, taasina waa jidka Eebe iyo sunnadiisa waxbadali kara ama leexin karana majiro.
waxaa sugnaatay in Rasuulkii Eebe (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisaha yeelee) uu yidhi: Eebe sareeye ma seexdo mana haboona inuu seexdo, qaybna wuu ridaa midna wuu koryeelaa, waxaana u kora camalka Habeenka Maalinta ka hor, ka Maalintiina Habeenka ka hor, waxaana ku xijaaban Nuur (Bukhaari iyo Muslim). Faadhir (40-43).

---

44. Miyeyna ku soconin dhulka ooyna dayeeynin siday noqotay cidhibtii kuwii ka horreeyey gaaladii Makaad, waxay ahaayeen kuwo ka xoogbadan,

أَوَلَمْ يَسِيرُوا۟ فِى ٱلْأَرْضِ فَيَنظُرُوا۟ كَيْفَ كَانَ عَٰقِبَةُ
ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ وَكَانُوٓا۟ أَشَدَّ مِنْهُمْ قُوَّةً وَمَا كَانَ

Eebana wax ku cajisiya (daaliya) ma jiro Samooyinka iyo dhulka dhexdooda midna, waana oge wax walba kara.

ٱللَّهُ لِيُعۡجِزَهُۥ مِن شَيۡءٖ فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَلَا فِي ٱلۡأَرۡضِۚ
إِنَّهُۥ كَانَ عَلِيمٗا قَدِيرٗا ٤٤

45. Hadduu Eebe u qaban dadka waxay kasbadeen (oo xumaan ah) kagama tageen dhulka korkiisa waxsocda, laakiin wuxuu dib ugu dhigi tan iyo muddo magacaaban, marka ajashoodu (Geeridoodu) timaadana Eebe addoomadiisa wuu arkaa.

وَلَوۡ يُؤَاخِذُ ٱللَّهُ ٱلنَّاسَ بِمَا كَسَبُواْ
مَا تَرَكَ عَلَىٰ ظَهۡرِهَا مِن دَآبَّةٖ وَلَٰكِن
يُؤَخِّرُهُمۡ إِلَىٰٓ أَجَلٖ مُّسَمّٗىۖ فَإِذَا جَآءَ أَجَلُهُمۡ
فَإِنَّ ٱللَّهَ كَانَ بِعِبَادِهِۦ بَصِيرَۢا ٤٥

**Waxaa haboon in lagu waano qaato maridda dhulka, si loo ogaaado kuwii beeniyay Nabiyada iyo xaqii iyo siduu Eebe ku falay, cidhibtoodiina noqotay halaag'iyagoo xoog, xoolo, Caruur iyo tiraba is bidayay, waxaasina wax ugama tarin cadaabkii Eebe iyo ciqaabtiisii midna, Eebana waa dulbadane'haduu sida loo dambaabi wax u ciqaabana waxba kuma reebeen dhulka korkiisa'wuxuuse la sugi xisaabta iyo abaal marinta muddo iyo maalinta Qiyaame,ee ruux walba Lakulmi abaalkiisa wax Eebe ka qarsoonna uusan jirin. Faadhir (44-45).**

## Suurat Yaasiin

## سُورَةُ يسٓ

Magaca Eebe yaan kuy billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. (Waxay ku tusin mucjisada Quraanka).

يسٓ ١

2. Quraanka xigmada leh yaan ku dhaartaye.

وَٱلۡقُرۡءَانِ ٱلۡحَكِيمِ ٢

3. Nabiyoow waxaad ka mid tahay kuwa la diray (Rasuulada).

إِنَّكَ لَمِنَ ٱلۡمُرۡسَلِينَ ٣

4. Jid toosanna waad ku sugan tahay.

عَلَىٰ صِرَٰطٖ مُّسۡتَقِيمٖ ٤

5. Quraankuna waa soo dajinta Eebaha adkaada ee naxariista,

تَنزِيلَ ٱلۡعَزِيزِ ٱلرَّحِيمِ ٥

6. inaad ugu digto qoom aan loo digin Aabayaalkood oo halmaansan.

لِتُنذِرَ قَوۡمٗا مَّآ أُنذِرَ ءَابَآؤُهُمۡ فَهُمۡ غَٰفِلُونَ ٦